



OFFICE of SUPERINTENDENT

10 Civic Center Plaza • Suite Two

P.O. Box 8741

Mankato, Minnesota 56002-8741

Office • 507•387•1868 Fax • 507•387•4257

## Macluumaadka Jawiga Xilliga Jiilaalka (Winter) ka ee 2022-2023

Gacaliye Waalidiin/Mas'uuliyiin:

Xogtan soo socota waxaa la idin siinayaa inta aad ku jirtaan u diyaargarowga xilliga jiilaalka ee gobolka Minnesota.

Go'aanka ah in lagu beddelo maalinta waxbaridda cimilada awgeed, marna looma samayn si fudud waxaana ku jira doorsoomayaal badan, laakiin xudunta go'aan-qaadashadayadu had iyo jeer waa badbaadada ardayda iyo shaqaalaha. Waad ku mahadsan tahay fahamkaaga iyo wada shaqayntiina.

Xiritaanka Iskuulka iyo Ogeysiisyyada bixintanka fasaxa hore waxaa lagu bixin doonaa bogagga soo socda, idaacadaha raadiyaha iyo telefishanka. Waxaa sidoo kale jiri doona **fariin duuban oo khadka degmada ah 507-386-4777.**

- [www.isd77.org](http://www.isd77.org)
- [katoinfo.com](http://katoinfo.com)
- KTOE
- KDOG
- KXAC
- KYSM-AM and FM
- KATO
- KXLP
- [mankatofreepress.com](http://mankatofreepress.com)
- [southernminnesotanews.com](http://southernminnesotanews.com)
- KEEZ
- KMSU
- KRBI
- KMKO
- KRRW
- [keyc.com](http://keyc.com)
- KEYC 12 - TV
- KSTP-TV
- KARE 11-TV
- WCCO Radio and TV
- FOX 9/MY29-TV

Waxa kale oo aad macluumaadka ka heli kartaa ilahan soo socda:

- Twitter kan isku qora @ISD77MAPS
- Aad kala soco Facebook-ga: Iskuullaadka Dad-weynaha ee Deegaanka Mankato (Mankato Area Public Schools)
- Si iimeel iyo fariin qoraalba aad u hesho halkan isku qor [www.isd77.org](http://www.isd77.org): riix batoonka "Akhbaar"/"News", guji "Bell symbol (summada Ganbaleelka)"

Haddii dugsiyadu u baahan yihiin in wakhti hore la eryo, ogeysiisyyada si fiican ayaa loo samayn doonaa ka hor inta aan basaska ka dhoofin dugsiyada. Waxay qaadataa ku dhawaad 1 1/2 saacadood adeeg bixiyayaashayada gaadiidku inay isu diyaariyaan bixitaan hore. Marka bixitaano hore la soo waco, fadlan ku xaddid wicitaanada taleefoonka ee dugsiga ardaygaaga, taas oo u oggolaanaysa shaqaalaha dugsiga inay shaqeeyaan si loo hubiyo in si badbaado leh oo ku habboon loo dhammeeyo maalinta waxbarashada.

Tilmaamaha soo socda ayaa la bixiyaa dib u eegistaada iyo tiixgelintaada:

- Marka la eego darnaanta xaaladda jirta, daryeel bixiyayaasha waxaa laga yaabaa inay jecel yihiin in ardaygooda ay kula kulmaan barta basaska istaago.
- Qoysasku waa inay samaystaan qorshe kale haddii ay dhacdo in basasku ay ardayda gurigoodu ku celin karin.
- Ardeydu waa markastaaba ay ku labbisnaadaan lebis cimilada ku habboon maxaa yeelay xaaladaha deg-degga ah waxay keeni karaan xaalado halis ah.
- Maamulayaasha way soo fasaxi doonaan ardayda ay waalidiintoodu/mas'uuliyiinta codsadeen in ay iyagu ardayda goor hore soo doonayaan. Fadlan gaarigaaga ha dhigin meelaha baska ardayda ka qaadaan ama ha xirin meelaha baska uu ka galoo ama meelaha laga baxo.
- aalmaha cimiladu adagtahay ee uu dugsigu ku jiro wakhtiga iyo fadhiga, waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah waxay gaadhaan go'aanka kama dampaysta ah ee ay ubadkoodu (carruurtoodu) dugsiga tagi doonaan iyo in kale. Haddii aadan soo dirin ilmahaaga (carruurtaada), fadlan wac dugsiga (yada) si aad uga warbixiso maqnaanshaha. Maalmahan, ardayda waa la cudur daaran doonaa laakiin waxaa lagu calaamadin doonaa maqnaanshaha, ardayduna waxay buuxin doonaan shaqada dugsiga ee seegtay.

Badbaadada ayaa Muhimada ugu sareysa dhammaanteen, oo degmaduna ay ka mahadcelineyo taageeradaada maadaamaan aan ka wada shaqeyeyno sidii aan u uga gudbi lahayn bilaha jiilaalka.

Daacadnimo,

Paul Peterson, Ed.D.  
Muraaqib